

FAAFINTA

RASMIGA

الرسمية



الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 11aad Muqdisho 25 Maarso 1983 L. 1r3

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA

جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S. QIIMADU waa 5 Shiin lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Ruknka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaa-bmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA

KCOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA

LABAAD

XEER

XEER SHARCI L. 2 ee 18 Maarso 1983,

Joojinta Qaadka.

Bogga 130

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 8 ee 17

Maarso 1983. Kordhin muddo Cafis. » 139

QAYBTA

SADDEXAAD

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,

3.3.83, Lumid Jeeg War. L. 298661 ku qoran Maxamed Ibraahim Wacays L. 60

» 140

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,

6.9.82, Lumid Jeeg War. L. 295867 ku qoran Ibraahim Cali Cumar L. 61

» 141

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,

9.3.83, Lumid Buug Kayd L. 5182 ku qoran Madiina Sh. Cumar L. 62

» 142

Madbacadda Qaranka

QAYBTA

LABAAD

XEER SHARCI

XEER — SHARCI L. 2 ee 15 Maarso 1983,
Joojinta Qaadka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qodobka 69 ee Dastuurka J.D.S;

ISAGOO ARKAY (Aqoonsaday): In Qaadka Adduunka looga aqoonsan yahay mukhaadaraadka si tartiib ah mujtamaca wax yeello ballaaran u geysta;

ISAGOO GARAWSADAY: Inay waajib tahay wax ka qabashada wax yaabaha dhibaato u geysta Caafimaadka, Dhaqaalaha, Anshaxa iyo Qoyska Ummadda Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: In joojinta Qaadka ay leedahay xaalad deg deg ah;

ISAGOO DOEGEYSTAY: Golaha Kasiirada:-

WUXUU XEERIYEY

Qod. 1aad

Laga billaabo dhaqangalka xeer-sharcigan waa la mamnuucay in Qaad dibadda looga soo dejiyo Dalka J.D.S.

Qod. 2aad

Qofkasta ee Qaad dalka J.D.S. dibedda ka soo geliya, soo qaada ama ka qayb qaata falalka noocaas ah waxaa lagu ciqaabayaa:-

— Laba ilaa Shan sannadood oo xabsi ah iyo ganaax

- Shan ilaa toban sannadood oo xabsi ah iyo ganaax u dhaxeeya Sh.So. 50.000/= ilaa 100.000/=, haddii qofka dembiga noocaas ah horay u galay.
- Qaadka oo la gubo iyo gaadiidka loo isticmaalay qaadidda qaadka oo lala wareego.

Qod. 3aad

Beeraha Dalka gudahiisa ee qaadku ku beeran ya hay dadka lihi waa inay ku baabi'iyaan muddo laba sanno ku eg (31.3.85) kuna beddelaan beer cunno.

Haddii qofkaasi sidaasi yeeli waayo beerta waa la gubayaa, asagana waxaa la saarayaa ganaax u dhaxeeya Sh. So. 10.000/= ilaa 50.000/=.

Qod. 4aad

Laga billaabo dhaqangalka xeer-sharcigan waa mamnuuc in qaad cusub dalka gudahiisa lagu beero, qofkii beerana waxaa la saarayaa ganaax u dhaxeeya Sh.So. 5.000/= ilaa 25.000/=.

Qod. 5aad

Qofka u xilsaaran ilaalinta iyo dhaqangalka sharcigan ee suuragal ka dhiga ama fududeeya in qaad dalka la soo geliyo, laga beero ama uu ku beernaado, wuxuu mutaysanayaa ciqaabaha qodobada sare ku xusan oo laba laab ah.

Qod. 6aad

Ciddii soo qabata ama kaalin ka qaadata dabar goynta dambiyada sharcigani sheegaya waxaa la sii nayaa abaalgud dhan 30% ganaaxa lagu xukumay dambiilaha (Sh.So. 5.000/= ilaa 20.000/=).

Qod. 7aad

Qaadista dacwadaha la xiriira dambiyada sharci-gaani dhigayo waxaa awood u leh Maxkamadda Bad-baadada Dalka.

Qod. 8aad

Xeer-sharcigaani wuxuu dhaqangelayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waana in loo gudbiyaa Golaha Shacbiga si uu u raasmiyeeyo.

Muqdisho, 18 Maarso 1983

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)